

Xeer lamb. 5 ee 30 Maarso 1965

Muddo dheereynta hirgelinta Xeerka Habka Cigaabta

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay 63 ee Dastuurka.

Kadib markii la garwaaqsaday baahidda loo qabo in la muddo kordhin loo sameeyo hirgelinta Dekreeto - Sharci lamb 1 ee 1 Juun 1963- ansixidda Xeerka Habka Cigaabta - si loo oggolado in muddo kordhin loo suubiyo si uu dalka oo idil uga hirgalo.

Kadib talo soo jeedinta Wasiirka Caddaladda iyo Garsoorka.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Taariikhda uu hirgeli doono Xeerka Habka Cigaabta oo lagu ansixiyey Dekreeto-sharci lamb 1 ee 1 Juun 1963 laguna soo faafiyey Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda 31 Disember 1964 waxaa lagu kordhiyey muddada ilaa 1da Agoosto 1965.

Qod. 2

Dekreeto-sharcigaan waxaa la horgeyn doona Barlaamanka Qaranka si deg deg si loogu beddelo sharci.

Muqdisho, 30 Maarso 1965.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddalada & Garsoorka

Shikh Abdulle Mahamud